

## MACLUUMAADKA AMMAANKA WADDADA

ADIGA AYAA MAS'UUL KA AH AMMAANKA CARRURTAADA MARKAY U SOCDAAN AMA KA SOO SOCDAAN DUGSIGA.

# Si ammaan ah u socio

Had iyo jeer qabo gacmaha ilmahaaga – markaad ku socotid waddada lugta ah, meesha baabuurta la dhigto iyo markaad waddada ka gudbayso – illaa intay ka gaarayaan 8 sano jiro.

Marka ay carruurtaadu u dhexeeyaan 8 ilaa 10 sano jir, si taxadar leh u ilaali markay aadka ugu dhow yihiin gaadiidka iyo meelaha waddada laga gudbo.

**Markaad go'aansato inaad u oggolaato carruurtaada ka weyn 10 sano jir inay u socdaan ama ka soo socdaan dugsiga, u qorsheeya safarka wadajir. Ku tababar inay noqdaan lugeeye ammaan ah:**

- ayagoo maraya bidixda waddada lugta
- ayagoo ka warqabaya baabuurta soo galaya ama ka baxaya dariiqyada guryaha
- ayagoo aan ku mashquulin qalabka moobaylka ama dad kale
- ayagoo isticmaala waddo nabadgelyo leh ama kale oo guriga loo maro markay jirto cimilada roobsan
- ayagoo umuujiya ixtiraam dadka kale ee waddada ku lugaynaya.

**JOOGSO!** hal tallaabo ujirso derbiga.

**EEG!** si joogto ah u-eeg labada dhinacba.

**DHAGAYSO!** shanqarta baabuurta soo-socota.

**KAFIIRSO!** ammaan ma tahay in la gooyo waddada?

### Wixii taageero dheeraad ah

Ka-qaybgal barnaamijka Waxbarashada Ammaanka Waddada ee Wasaaradda  
<https://education.nsw.gov.au/road-safety-education> ama ka eeg  
<https://education.nsw.gov.au> oo baar waxbarashada ammaanka waddada.

### Ku dhiirigeli carruurtaada:

- inay marwalba isticmaalaan meelaha amaan ah oo looga gudbo waddada sida meelaha dadka lugta ah ka gudbaan, nalalka gaadiidka ama meelaha looga gudbo dugsiga, haddii la heli karo
- inay hubiyaan baabuurta soo leexanaysa ka hor intaysan goyn waddada iyo dariiqyada guryaha
- marna yey u maleynin in darawalku uu arki karo ama uu ka joogsan doono iyaga
- Inay indhaha isa-saartaan darawalka si ay u ogaadaan in darawalku uu arkayo ayaga
- inay sugaan illaa uu darawalku si buuxda u joojiyo baabuurka ka hor inta aanay ka gudbin waddada ama dariiqyada guryaha.

